



## S&J qaabdhismeedka cusub

Qaabdhismeedka halista ee cusub wuxuu ka caawinayaa dadka Oregon inay uga baxaan jiilaalka iyo gu'ga si badbaado leh. Tallaalka COVID-19 ayaa dhawaan imaanaya. Laakiin intaa kahor, iyo ilaa aan ka gaarno heerka difaaca cudurka, waa inaan sii wadnaa tallaabooyinka yareynta.

### **S: Maxay Oregon uga guuraysaa wajiyada hore uguna guuraysaa qaabdhismeedka cusub?**

**J:** Wajiyada maysan oggolaan dhaqdhaqaaq badan. Qaabdhismeedka cusub waa mid dabacsan.

### **S: Sidee ayuu qaabdhismeedka cusub u shaqeeyaa?**

**J:** Si aad u fahamto sida qaabdhismeedka cusub u shaqeeyo, waxaa fiican inaad ogaato saddex shay:

1. Qaabdhismeedka cusub wuxuu ku salaysan yahay [xogta cabbiraadaha dugsiga](#).
2. 36 da degmooyin ee Oregon waxaa loogu qeybiyay sadex kooxyo qaabdhismeedka:
  - Degmooyin waawayn oo dadka deggan ka badan yihiin 30,000
  - Degmooyin dhexe oo dadka deggan u dhexeeyaan 15,000 ilaa 30,000
  - Degmooyin yaryar oo dadka deggan ka yar yihiin 15,000
3. Qaabdhismeedka cusub wuxuu u qaybiyaa halista afar qaybood oo ku salaysan faafidda COVID-19:
  - Halis Yar
  - Halis Dhexe
  - halis Sarreyso
  - Halis Daran

### **S: Sidee degmooyinka loogu meeleeyaa qaybaha halista?**

**J:** Degmooyinka waawayn (dadka >30,000), heerka qabitaanka cudurka waa mid kamid ah laba ah cabbiraadaha la tixgalyey si loo xisaabiyo qaybta halista. Arrinta kale waa

heerka dacwadaha ee 100,000 ee qof. Go'aaminta guud waxay muujinaysaa tallaabada ugu xayiraadda badan. Markaa, tusaale ahaan, haddii Degmada Josephine ay ku jirto qaybta Dhexe oo heerka iyo qaybta Daran ee boqolkiiba jiritaanka cudurka, marka degmada waxay ku jireysaa qaybta ugu xayiraadda badan, qaybta Daran.

Degmooyinka dhexe (dadka 15,000 ilaa <30,000), heerka qabitaanka cudurka waa mid kamid ah labada cabbiraadaha la tixgalyey si loo xisaabiyo heerka halista. Kan kale waa tirada dacwadaha. Go'aaminta guud waxay muujinaysaa tallaabada ugu xayiraadda badan.

Degmooyinka yaryar (dadka <15,000), kaliya tirada dacwadaha ayaa la tixgaliyaa si loo go'aamiyo qaybta halista.

**S: Intee jeer ayaa degmo uga wareegi kartaa una wareegi kartaa hal qaybta halista ah?**

**J:** Xogta cabbiraadaha dugsiga ayaa la soosaaraa Isniin kasta waxaana loo isticmaalaa go'aaminta qaybaha halista degmada. Waxaad ka heli kartaa iyadoo la soo dhigay websaytka OHA COVID-19.

Toddobaadka koowaad waa "toddobaadka digniinta." Ma jiro dhaqdhaqaaq degmooyinka iyo wax isbaddalo ah khariidadda heerka halista ee OHA iyo websaydyada [xafiiska Badhasaabka](#).

Toddobaadka labaad waa "toddobaadka tallaabada." Xogta waxaa mar kale la soosaaraa Isniinta. Xafiiska Badhasaabka ayaa ogaysiiya degmooyinka haddii ay suurtoagal tahay inay ka wareegaan hal qayb haliseed una wareegaan mid kale sida ku saleysan xogta cusub. Xafiiska Badhasaabka sidoo kale wuxuu dirayaa war saxaafadeed ku saabsan wixii isbaddalo. Degmada waxay si caadi ah ugu wareegtaa qayb haliseedda cusub dhammaadka toddobaadka.

**Helitaanka dukumiintiga:** Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, far waaweyn, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us)